


 SOMALI FEDERAL REPUBLIC
 Ministry of Labor and Social Affairs
 Office of the Director General

Tixraac: WASHAB/ AG/220/2020

Taariikhda: 30/03/2020

Ku: Dhammaan Hey'adaha Dowladda.**Ku: Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dowladda.****Ku: Wasaaradaha Shaqada ee Dowlad Goboleedyada.****Og: Wasiirka Wasaaradda Shaqada & Arrimaha Bulshada.****Og: Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha JFS.****Og: Xafiiska Madaxweynaha JFS.**
**Ujeedo: Muddo Kordhin Hakinta Xaadiridda Shaqaalaha Howl
Maalmeedkooda, Caabuqa Corona Virus (Covid-19) Dartiis.**
Wasaaradda Shaqada & Arrimaha Bulshada iyadoo tixgelineysa

- Faya dhowrka iyo Bad qabka iyo Caafimaadka dhammaan ummadda Soomaaliyeed, gaar ahaan Shaqaalaha,
- Isla markaana tix gelineysa Warqadda ka soo baxdey wasaaradda Caafimaadka ujeeddadeeduna aheyd hakinta faafidda caabuqa Corona virus (Covid - 19) iyo ka hortaggiisa, summaddeeduna aheyd MOH&HS/MOHO/0421/Mar/2020, soona baxdey 16 Mar 2020, kuna saxiixneyd Wasiiradda Wasaaradda Caafimaadka,

Ayaa Wasaaradda waxey ogeysiineysaa dhammaan Hey'adaha Dowladda laga billaabo 02/04/2020 ilaa 10/04/2020 in Shaqaalaha la yareeyo isu imaatinkooda oo ay ku shaqeeyaan guryahooda, iyagoo adeegsanaaya barahooda mareegta (Internet), sidoo kale Agaasimayaasha iyo intii aan laga maarmi karinna yimaadaan goobaha shaqada, si loo yareeyo faafidda Cudurka.

Shaqaalaha waxaa la farayaa:-

- In aan ka fogaadaan isa salaamidda oo keliya ay ku ekaadaan salaanta Islaamka.
- In haddii ay heli karaan ay gashadaan Gloves-ka gacnaha.
- In ay isticmaalaan dareeraha gacnaha lagu nadiifiyo ama Saabuun.
- In ay gacnahooda ka ilaaliyaan Indhaha, Sanka iyo Afka intii karaankooda aha.
- Qofkii isku arka Calaamadaha Cudurkaasna ku dadaalo in uu ka ilaaliyo Bulshada inteeda kale.

Wada Shaqeyn Wacan,
Maxamed Cadde Mukhtar
Agaasimaha Guud ee W. Shaqada


Add: Beside of Jubba Hotel, near Police Head Quarter, Shingani - Mogadisho - Somalia,

Email: dg@molsa.gov.so, ministry@mol.gov.so, Cadde337@gmail.com Tell: +252 616 456 767